# Maalinta Aad Leedahay Wicitaanka Dhakhtarka (Muuqaalka)

Booqashada xigta ee aad adigga ama cunugaagu ku imaanaysaan Nationwide Children's Hospital waxuu noqon doonaa caafimaadka isgaarsiinta casriga ah ku baxa (telehealth) waxaana lagu samayn doonaa muuqaalka appka Zoom iyo akoonkaaga appka MyChart. Caafimaadka isgaarsiinta casriga ah ku baxa (Telehealth) ayaa noo sahlaaya inaan ku caawino adiga iyo cunugaagaba adinkoon si shaqsi ah u imaan xarunta.

Waxyaabaha aad u baahan tahay kahor booqashadaada muuqaalka ah:

1. MyChart: Ciwaanka MyChart oo ku meel gaar ah ama mid shaqaynaaya iyo aalad aad ku gasho. Ka fiiri lifaaqan wixii macluumaad dheeri ah oo ku aadan MyChart: https://www.nationwidechildrens.org/family-resources-education/mobile-apps/mychart
2. Appka Zoom: haddii aad doonayso inaad adeegsato taleefankaaga casriga ah.
3. Kumbuyuutar leh kaamiro iyo mikarafoon: haddii aad doonayso inaad adeegsato kumbuyuutarkaaga.

**Haddii aadan haysan waxyaalaha kor ku xusan, booqashadu ma dhacayso.**

## QAYBTA I – U adeegsiga kumbuyuutarkaaga booqashadaada muuqaalka ah

**Haddii aad adeegsanayso taleefankaaga casriga ah, gal qaybta II.**

Isla marka aad qabsato balanta muuqaalka ah u diyaar garoow booqashada.

**Codso akoon MyChart** ah haddii aadan horay u samaysan. Booqo barta https://mychart.nationwidechildrens.org/MyChart/publicforms.asp?mode=showForm&formname=ActivationReq

Maalinta aad booqashada leedahay, **gal akoonkaaga MyChart 15-30 daqiiqo kahor xiliga booqashada**.

**Si aad u gasho akoonkaaga MyChart** gal barta. https://mychart.nationwidechildrens.org/MyChart

Kadib markaad furto akoonkaaga, guji magacaaga/magaca cunugaaga, guji qaybta **ECHECK-IN (GAL)**



Ayadoo ku xiran nooca ciwaanka MyChart ee laguu furay, bogga koobaad ayaa muujinaaya **personal information (Macluumaadka Shaqsiga ah)**. Fadlan akhri xogta si aad u hubiso inay sax tahay. Haddii ay sax tahay guji




Haddii aysan sax ahayn guji **EDIT (WAX KA BADAL)** si aad wax ugu darto.




*Su'aasha Guud - Taariikhda Dhalashada:*

- *Haddii aad waalid ama masuul siinayso ogolaansho uu ku galo ciwaankaaga MyChart, waa taarikhdooda dhalashada*
- *Haddii ay tahay galitaanka diiwaankaaga, waa taariikhdaada dhalashada*

Marka aad dhamayso waxyaabaha aad ka badalayso guji




Kadibna guji



Shaashada xigta waa **foomamka Ogolaanshaha**. Foomamkaan waxay noo sahlayaan inaan booqashadaan kula samayno.

Waxaad u baahan doontaa inaad akhrido kadibna **SIGN (SAXIIXDO)** mid kasta oo kamid ah foomamka la heli karo si aad saxeexdo.




Foomka ayaa iskiis isku buuxinaaya.

Guji **Next button (batoonka Xigga)** (batoonkaan ayaa kaliya soo baxaaya kadib markaad saxeexdo foomamka saxda ah)




Shaashada xigta waxay ka hadlaysaa **caymiska**.

Fadlan akhri xogta si aad u hubiso inay sax tahay. Haddii ay sax tahay guji



Haddii aysan sax ahayn, guji **Update coverage (Wax ka badal caymiska)** ama **Remove Coverage (Ka saar Caymiska)**




Haddii aadan haysan macluumaadka caymiska oo ku qoran faylka ama aad u baahan tahay inaad ku darto xogta, guji add (kudar), sida ka muuqata hoos




Si aad usoo gashato kaarkaaga caymiska:

1. Sawirada kaarkaaga ku qaad taleefankaaga gacanta, una dir kumbuyuutarkaaga.
2. Guji **Add Insurance Card Photos (Kudar Sawirada Kaarka Caymiska).** Soo gali sawirada.

Markaad dhamayso, guji **SUBMIT (GUDBI)**



Hadda waxaad ku gujin kartaa batoonka dhahaaya **Begin Video Visit (Biloow Booqashada Muuqaalka)**. **(Batoonka Biloow Booqashada wuxuu shaqaynayaa ilaa 30 daqiiqo kahor intaan la gaarin waqtiga balantaada)**




MyChart ayaa si ootomaatig ah u furaysa aalada zoom ayadoo ku xiraysa aqoonsiga kullanka oo sax ah markaad gujiso qaybtaan Batoonka Begin Video Visit (Biloow Booqashada Muuqaalka) gudaha aalada MyChart.




Waad ku jiraysaa muuqaalka ilaa dhakhtarku ka bilaabo kullankaaga Zoom.

Marka adeeg bixiyahaagu diyaar yahay, waxaad arki doontaa batoon dhahaaya **JOIN VIDEO (KU BIIR MUUQAALKA)**. Riix batoonkaas kadibna kullanka ayaa bilaabanaaya.

Tilmaan: Haddii marka aad ku jirto booqashada midkood aaladaha MyChart ama Zoom uu kuu shaqayn waayo, iskuday inaad kagasho kumbuyuutarkaaga badalkii aad taleefanka ku isticmaali lahayd ama sida kale.

## Qaybta II – U adeegsiga taleefanka casriga ah booqashadaada muuqaalka ah

**Haddii aadan haysan taleefan casri ah kullankaan kuma gali kartid taleefan hore.**

Isla marka aad qabsato balanta muuqaalka ah u diyaar garoow booqashada.

1. **Codso akoonkaappka MyChart** haddii aadan horay u samaysan. Booqo barta https://mychart.nationwidechildrens.org/MyChart/publicforms.asp?mode=showForm&formname=ActivationReq
2. Soo dagso aalada **Zoom Cloud Meetings** oo ku shubo abka taleefankaaga.
3. Isla markaba hubi si aad u xaqiijiso in aalada aad soo dagsatay. Haddii aad dhibaato ku qabto soo dagsashada aalada, halkaan guji si aad u hesho tillaamo iyo xeelado ay diyaarisay **Zoom**. https://support.zoom.us/hc/en-us/articles/206175806-Frequently-Asked-Questions
4. **Ha furin appka Zoom marka aad biloowdo booqashada MyChart.** MyChart ayaa si ootomaatig ah u furaysa Zoom ayadoo muujinaysa Aqoonsiga Kullanka oo sax ah markaad gasho.

Maalinta aad booqashada leedahay, **gal akoonkaaga appka MyChart 15-30 daqiiqo kahor xiliga booqashada**.

Kadib markaad furto ciwaankaaga MyChart, guji magacaaga/magaca cunugaaga, guji qaybta, balamaha kadibna







kadibna **ECHECK-IN (GAL).**



Ayadoo ku xiran nooca ciwaanka MyChart ee laguu furay, bogga koobaad ayaa muujinaaya **personal information (Macluumaadka Shaqsiga ah)**. Fadlan akhri xogta si aad u hubiso inay sax tahay. Adeegso batoonka edit (tafatir) si aad u badasho macluumaadkaad rabto.




Haddii macluumaadku yahay mid sax ah dooro bokiskaas kadibna riix batoonka Next (xigga)






Waxaad arki doontaa foomamka **ogolaanshaha** oo oonleen ah si aad u buuxiso kahor booqashadaada. Waxaad u baahan tahay **inaad akhrido aadna saxiixdo** mid kasta oodan wali saxeexin.







Markaad dhamayso hal foom, guji **CONTINUE (SII WAD)**




Marka aad saxeexdo dhammaan foomamka, guji batoonka **NEXT (XIGA)**



Shaashada xigta waxay ka hadlaysaa **caymiska**. Fadlan akhri xogta si aad u hubiso inay sax tahay. Haddii ay sax tahay, guji




Haddii aysan sax ahayn, guji **update coverage (Wax ka badal caymiska)** ama **Remove Coverage (Ka saar Caymiska).** Haddii loo baahdo, guji **Add Insurance Card Photos (Kudar Sawirada Kaarka Caymiska),** sawiro ka qaad kaarkaaga caymiska ayadaana si otomaatig ah isku saxaysa.



Markaad wax ka badasho ama saarto macluumaadka, guji batoonka **This information is correct (xogtaan waa mid sax ah)**




Kadibna dhagsii batoonka **SUBMIT (GUDBI)**




Markaad dhamayso dhammaan talaabooyinkaan waxaad arkaysaa qaybta **eCheck-In Complete (Galitaanka Oonleenka ah waa La dhameeyay)**.



Markaad dhamayso Galitaanka oonleenka ah aadna saxiixxdo foomamka ogolaanshaha waxaad arki doontaa batoon ay ku qoran tahay **Begin Visit (Biloow Booqashada).** Batoonkan ayaa sii shaqayn doonaa ilaa 30 daqiiqo kahor intaan la gaarin xiliga booqashada loo qorsheeyay.




Markaad batoonkaan gujiso wuxuu ku gaynayaa kullanka Zoom.

Tilmaan: Ha furin aaladaada Zoom marka aad biloowdo booqashada MyChart. MyChart ayaa si ootomaatig ah u furaysa Zoom ayadoo muujinaysa Asoonsiga Kullanka oo sax ah markaad gasho.



Haddii aan dhakhtarkaagu wali ka qaybgalin kullanka waxaad arki doontaa shaashad ay ku qoran yihiin xogta sida kor ka muuqata. Haka bixin kullanka. Dhakhtarku wuu kugusoo biirayaa. Ma uu ilaawaayo booqashadaada muuqaalka ah.

## Qaybta III

**Haddii waalidka ama ilmaha isticmaalaaya kootadooda gaarka ah ee MyChart uu doonaayo inuu soo galo wicitaanka kadib marka qof kale dhammeeyay kullanka oonleenka ah, raac tilmaamaha hoose si aad ugu biirto.**

Gal qaybta **Visits (booqashooyinka),** kadibna **Appointment and Visits (Balamaha iyo booqashooyinka)**. Guji **DETAILS (FAAHFAAHINTA)**






## Qaybta III

Haddii aad leedahay booqashooyin kale markaad samaysay kadib booqashadii hore, xogta ayaa kugu flan 30 maalmood, aadana u baahnayn inaad dib u buuxiso qaybta galitaanka oonleenka ah markale. Gal qaybta **visits (booqashooyinka)**, kadibna **appointments and visits (Balamaha iyo booqashooyinka)**. Gal appointment (Balanta) kadibna guji **Details (Faahfaahin).** Kadibna guji **Begin Video Visit (Biloow Booqashada Muuqaalka ah).**